MUJAAHID AXMED MIRE:

AAMUSNIDUUU KU ASTURNAA:

BAHDA MAREEGTA FARSHAXAN

OCTOOBER 15,2017


Gadhlow awr kala guurtey la arkee mar kaleeto
in ay ood ku kulmaana haduu uur kala guuro
sow amuur culus maaha ololihii halgankeena
cukusoow arah guulka dhib waxaan u adkeystay
waxaan is-lahaa mar uun baad arligaagiyo
iyadoon faqash joogin kula iidi dadkaadee
kolkii waagu iftiimay sidaan ahay Ina dhoore
usarkaan ka dhex toosay indha u daranaa
marka duul asal guuro in Ilaah ka biyeeyo
dadkoo yaala abaar haduu roob iba dooxmay
ku bashiisho agteyda intaan soo ordayaabaa
darku sii engegaa Abuur baan ku tabcaa
irfidaan geliyaa iniin baan ku ridaa
udan bay bixisaa gooso baan is-idhaa
waa la ii arfacaa
Abwaan Maxamed Xaashi –Gaarriye- “IHUN”

Afeef:

Qof muran galin kara u malayn maayo inuu jiro ahaanshaha uu mujaahid Axmed Mire ahaa hogaamiyihii ciidamdii SNM-ta ee Burco duhur cad galey,inuu in badan oo noloshiisa danta guud u huray,inuu inaga mudan yahay wanaag iyo xusid. Qoraalkani intaa midna kama

hadlayo ee wuxuu ka hadlayaa aragtidiisa ku aadan Xisbiyada Siyaasadeed ee Soomaaliland iyo sababta uu ummada Soomaaliland ugu kala doorey uuna ku cadeeyey qoraalkiisa……..
Xisbiyada Siyaasadeed ee qaranka Soomaaliland waa horu-socod ay bulshadu gaadhey, dalka Soomaaliland-na ku talaabsadey hase yeeshee u baahan dibu habeyn ku aadan qaabka xubinimada, barnaamijka siyaasadeed, xeerka xisbiyada,iwm.

Hordhac:




Waxaa loogu hawlgaley habka Xisbiyada in lagaga guuro habkii reernimada, loona guuro in mabda' ahaan la isku taageero, hogaanka dalkana kolba bulshadu codkeedu ku xulato. Hase yeeshee waxaa in badan dhagaha bulshada ku soo dhacayey xusida magacda reeraha. Waxaa mareegaha Soomaaliland aad u dhex mushaaxa hadh iyo habeen erayo laga soo xigto madaxda siyaasada iyo madax dhaqameedkaba oo tilmaamaya reero ku biiray Xisbi ama reero ka tagey Xisbi. Dhaguhu kamay biyo diidin arimahaasi, sidoo kale xisbiyaduna may hor istaagin shir beeleedka hadh iyo habeen qabsoomaya.

Erayada ama weedhaha aad warbaahinta ugu badan, loona sameystay mareego kala raacsan xisbiyada qaranka waxaa ka mid ah: " Salaadiinta Subeer Awal oo taageero u muujiyey Xisbiga KULMIYE; Salaadiinta beelaha Samaroon oo taageero u muujiyey WADANI;Salaadiin ka soo jeeda beelaha Habar Awal oo taageeray WADANI; Salaadiin ka soo jeeda beelaha Habar Awal oo taageeray Xisbiga KULMIYE;Salaadiinta beelaha Samaroon oo taageero u muujiyey xisbiga UCID;Salaadiinta Garxajis iyo Dhulbahante oo si weyn iskula qaatey in WADANI la doorto; Shirkii Laascaanood ee qaar ka mid ah beelaha Garxajis iyo qaar ka mid ah beelaha Dhulbahante oo ka dhacey Laascaanood bishan Oktoober 14,2017; Salaadiinta beelaha Samaroon oo taageero u muujiyey WADANI;

## Falcelinta Qoraalka Mujaahid Axmed Mire:

Wallee "qaaf" ujeeddo leh
Qiimahayga kuma rido;
Magac waa qasaanade
Wallee qado ma dhaafsado.

Wallee qalabka maansada
Heesaha qumbuladda ah
Uma qubo dhugmo-la'aan.

Ninkii beesha qaayima
Qar hadduu ku soo dumo,
Wallee ciidda kama qodo.

Wallee qalin-daraalaha
Dambi qaranka laga galay
Kama qariyo wadhatada.
Wallee qoonta mililka leh
Qaarka sare ma dhaydhayo.

Abwaan Maxamed Xaashi –Gaarriye- "IHUN"

Mujaahid Axmed Mire waxaa dalka Soomaliland ugu danbeysay xilli ku beegnayd 1998[kii]. Waxaa lagu sababeeyaa inuu salaanka siyaasada ka arki waayey meel uga banaan. Sidoo kale waxaa sheegid mudan in xilligaa waxyaabo badan loo tirinayey. Dhibaatooyin badan oo dalka ka dhcey xilligaa ayaanu ka fara madhneyn. Mar la waydiiyey xaalkiisana waxaa laga hayaa weedha ah "Ilaa hadda baarashuutkaa ii go'an meel uu i dhigi doonnana mooyi"

Hase yeeshee xilli ku beegnayd badhtamihii gu'gii 2016[kii] ayuu mujaahid Axmed Mire go'aansadey inuu dalka Soomaaliland dib ugu laabto. Waxay aheyd guul uu qof kasta oo reer Soomaaliland ahi soo dhaweeyey, dareen midaysan oo ka yimid muxaafid iyo mucaarid ayaa u holadey soo dhaweyntiisa.

" Dadkii reer UK ee maanta halkan igu sii macasalaameynaya, aniguna halkan ayaan ku sii macasalaameynayaa iyaga..Waxaana maanta aniga farxad ii ah anigoo ku sii socda dalkii oo in muddo ah ka maqnaa ..waxaana aad u muuqata in dadka reer Soomaaliland guddo iyo dibadba

inay ididiilo weyn ay muujiyeen, socodkan aan ku sii socdo dalkii aad iyo aad baan ugu faraxsan nahay ..Dhamaantiina kuwa jooga , kuwa maqan, kuwa dalka jooga, meel kastood kala joogtaanba waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka –Assalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu-” ayuu yidhi mujaahid Axmed Mire oo ka sii duulayey madaarka Heathrow ee cariga Ingiriiska,kulana hadlayey dadkii sida milgaha leh u sii galbinayey.

Socdaalkii uu UK kaga kicitimay ayuu mujaahidku ku soo gunaanadey dalka Soomaaliland. Dareen midaysan oo farxad iyo niyad wanaag huwan ayey dadweynihii reer Hargeysa oo iskugu jira muxaafid iyo mucaarid madaarka Hargeysa ku soo dhaweeyeen mujaahidka .

Mujaahid Axmed Mire Maxamed oo ka hadlayey soo dhaweyntii qiimaha laheyd ee loogu sameeyey magaalada Hargeysa ayaa hadaladiisii waxaa ka mid ahaa: “ Waxaan Illaahay ugu mahadnaqayaa intaasoo laga yaabo inaaney baryahan meel iskugu yimaadaan imaatinkayga waa midnimo waxaanan jecelahay waar aan midawno”. Waxay aheyd weedhaasi weedh aad loogu doogsadey lagana filayey inuu u hawlgalo ka dhabeynta,Hadalkaasi dhagaha ummadu aad ayey u soo dhaweeyeen,laabuhuna ku doogsadeen. Labada weedhood ee mahadnaqa ahba wuxuu mujaahidku kaga dhawaaqey labada Madaar ee Heathrow, UK iyo Cigaal, Somaliland. Waxaaney muujinayeen sidii maamuuska laheyd ee soo dhaweyntiisa bulshadu uga qayb qaateen dibad iyo gudaba, muxaafid iyo mucaaridba.

Hase yeeshee markii uu dalka ka noqdey weedhii ugu horeysay ee ka yeeshay ayaa noqotay qoraal ku suntan kala fogeyn ummadeed iyo hurin colaad oo aan haboneyn . Waa loo hanweynaayeee ma is hanaq gooyey.

Horaantii bishii Juun ee gu’gii 2016kii ayaa Mujaahid Axmed Mire aad loogu soo dhaweeyey dalka Soomaaliland ,.Dawlada Soomaaliland ayaa u xilsaartey koox wasiiro ah inay soo dhaweyntiisa si mudan uga qayb qaataan. Markii uu Mujaahid Axmed Mire aad uga mahadnaqey soo dhaweyntaa ayuu kulan sharafeed ugu tagey mujaahid Muuse Biixi oo ku sugnaa guriga uu galo.

Waxaa Mujaahid Axmed Mire booqashadaa ku wehehlinayey mujaahidiinta ay ka mid yihiin Ibraahin Cabdilaahi Dhagaweyne, Maxamed Xasan Jidhif iyo Cabdiraxmaan Aw Cali.

Kulankaasi waxaa la isdhaafsadey sheekooyin laga fili karo dad in badan nolosha wada qaatey oo kala raagey, kaftan xeladeysan iyo xifaaltan siyaasadeysan.

Kulankaasi markuu dhamaadey dadka aad u falanqeeya siyaasadu waxay filayeen in mucaaridnimo muuqata uu muujin doono Mujaahid Axmed Mire oo ku aadan mujaahid Muuse Biixi. Hase yeeshee markii uu Mujaahid Axmed Mire ku guryo noqdey gaboodkiisii siyaasadeed ee caro Ingiriis hadal iyo qoraal midna lagama helin ee sidiisii hore ayuu weheshadey aamus xirfadeysan.

Waxaase muuqata marka qoraalkiisa la eego inuu falcelintiisa mucaaridnimo ee laga filayey la sugayey soo dhawaanshaha doorashada. Waxaanse laga fileyn Mujaahid Axmed Mire inuu bulshada u kala dooro Kulmiye iyo Wadani isagoo ku saleynaya xurgufta siyaasadeed ee ka dhaxeysa isaga iyo Muuse Biixi. Taageerada uu u fidiyey musharax Cabdiraxmaan Ciro xaq buu u leeyahay ee tilmaanta uu ummada siiyey eek u aadan kala doorasahda labada xisbi ayaa mudan in la falanqeeyo. Waxay innagu kalifeysaa inaan dib u raacno had-dhaqankiisii siyaasadeed iyo xurgufihii la soo dhaafey oo sal u ah tilmaantiisa.

Markii uu mujaahid Mire dalka Soomaaliland joogay muddo hal todobaad ku dhawaad ah ayaa shir ka dhacey xaafada Masalaha ee magaalada Hargeysa la isugu yimid. Mujaahidku kulankaa wuu soo dahweeyey,kamanuuna biyo-diidin sidii uu u socdey iyo halkuu ku aroorayey. Eraydii uu kaga dhawaaqey mujaahidku Madaarka eek u aadanaa midaynta bulshada iyo mujaahidiinta ayaa laga filayey u hawlgalkiisa.



Kulankaasi wuxuu qabsoomay maalin Jimce ah oo ay bishu aheyd Juun 10dii, 2016kii. Kulankaasi waxaa aad uga muuqday mujaahid Axmed Mire ,Cali-sanyare iyo Ismaaciil Buubaa. Waxaase madasha aan ka maqneyn hal-doorka galbeedka Burco iyo Koonfurta Hargeysa, marka laga reebo inta muxaafidka kaga jirta. Mujaahid Axmed Mire kulankaasi wuxuu uga qayb

qaatey inuu  muujiyo mucaaridnimadiisa, wuxuuse ku ibo furey  reernimo. Kulankaasi waxaa la isla qaatey in   la qorsheeyo sidii taageero mug iyo miisaan leh loogu fidin lahaa xisbiga Wadani. Waxaana  isla goobtaa lagu dhisay  guddi ka kooban   labada    qaybood ee  galbeedka Burco iyo Koonfurta Hargeysa oo arimahaa sii   lafo-gura.

Bulshada reer Soomaaliland oo aad uga dharagsan kulankaa iyo kulamadii kale ee mujaahidku ka qayb qaatey intii u joogay dalka ayaan afkiisa waxba laga maqal. Bulshada waxaa galey inuu mujaahidku dib isugu noqday, dib u eegisna uu ku  jiro. Sidaa darteed aad ayaa looga dhursugayey inuu  kulamadaa  go'aamadii ka soo baxey  noqdo  mujaahid u hogaansan, iyo inuu qaranimadii uu u halgamayey ka door biddo.  Waxaase marag ma doon ah  inuu   bulshada Soomaaliland la wadaagey  siduu ka yeelay  kulamadaa iyo go'aamadii reeraysnaa ee ka soo baxey. Qoraalka wuxuu mujaahidku ku  xusay laba weedhood oo   aan meel wada qaban. Wuxuu sheegay "Anigu inta aan noolahay waxaan u taaganahay badbaadada dalkayga horena waan u badbaadiyey markii Nin waliba gabaday ee Dawladihii heshiis dhex maray ayaan ka badheedhay Taliyihii ciidamada SNM waan ku waayey laakiin ciidaydii baan hantiyey deyrkii laga baqayna waan jebiyey oo Burco ayaan hadh cad galay aniga iyo mujaahidiintii xaq u dirirka ahayd" .




Haddana qoraalkaa wuxuu ku sheegay  weedh kale  oo aheyd "Qabiil waxa magansada Nin aan istaagi karayn. Waxan ina soo maray waxyaalo u qaadan waa ah oo lagu celceliyo wax Qaran dumis ah oo aan faa'iido u lahayn Qaranka Somaililand. Ninkii doonaya in lagu kala tago dalka oo Nabadda la dhaawaco kulmiye ha taageero. Ninkii dadkiisa iyo dalkiisa dani ka haysaana ee Nabadda iyo midnimada jecelina Waddani ha siiyo codkisa"..

Bal bulshada uu qoraalka la wadaagey ma caqligooga ayuu mujaahid Axmed Mire caayayaa??? Miyaanu mujaahidku ka qayb galin kulamo qabiileysan??? Miyaanu Mujaahidku  fulinayn go'aamadii ka soo baxey kulandii reeraysnaa???

Umaddii daryeel wali ma helin daacada ahaydee,
Sidii bay u dooyaysan tahay damashii weynaydee,
Sidii bay duleedada dhar li;i ugu dab jeexaannee,

Sidii baa dudada aar dhiciyo dacaw u joogaayee,
Sidii baa dugaag uga gurtaa daaqa xoolaha,e,
sidii baa docuhu aqaladu uga daloolaannee,
Sidii baa darroorimada iyo daad u gelayaayee,
Sidii bay degmadu ceelashii ugu dar leeftaayee,
Sidii ducaalow biyaha loo dawariyaayee,
Sidii bay daba-goobsi u tahay haradii doolloodee,
Oo ay waliba dibin daabyo iyo diriri joogtaayee,
Waakaa dareersaday xamar dayr cadkii dhalayee,
Dambi ku hadli maayee ma arag dawladaan rabayee,
Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galayee,

**Abwaan Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasim",(IHUN)**

## Tixraac:


- **Muj. Axmed Mire oo mudo dheer aamusnaa oo qoraal ka soo saaray xaalada dalku maraayo kana dayriyay…….**

Writen by Qaran News | 10:02 pm 14th Oct, 2017

https://qarannews.com/muj-axmed-mire-oo-mudo-dheer-aamusnaa-oo-qoraal-ka-soo-saaray-xaalada-dalku-maraayo-kana-dayriyay/

-SALAADIINTA BEELAHA GARXEJIS IYO DHULBAHANTE OO ISLA QAATAY IN LA DOORTO MUSHARAX CIRRO IYO WADANI

https://www.youtube.com/watch?time_continue=265&v=nB-aBkjfn6s

**- BEELAHA SUBEYR AWAL IYO DHULBAHANTE OO KULAN KU YEESHAY LAASCAANAOOD**

https://www.youtube.com/watch?v=_6SgrXFmJtk

**-Ex Wasiir Xirsi Maxaa Ka qabsaday Shirkii Beelaha Biciide Yoonis? Siyaasiyiin isu Duur Xulay**

https://www.youtube.com/watch?v=u2B8IAcUjM0

**-XIRSI CALI XAAJI X XASAN OO BEEN LAGU HAYSTO UU KA SAMEEYAY BEELAHA BICIIDE**

https://www.youtube.com/watch?v=gK3YiQB3dTg

**-Cirro Iyo Muuse Biixi Oo Kala Jiidanaya Dhulbahante Iyo Warsangali**

https://www.youtube.com/watch?v=VnKYWHSBWaU

**-Beesha Axmed Faarax oo Madaxweyne Siilaanyo u Cadaysay inay la Dhisayaan Murashax Muuse Biixi**

https://www.youtube.com/watch?v=sWIGOwZ-U8o

**-Shikii beesha Axmed Faarax ayuu Xirsi Xaaji Cali ka jawaabay eedo xisbiyada mucaaridku (Wadani iyo UCID) soo jeediyeen:**

**https://www.youtube.com/watch?v=kqNWHi-yBt8**

**-BEESHII HABAR AWAL OO DHAN OO BORAMA ISKUGU YIMI SI AY BEESHA MAKAAHIIL ULA KULMAAN:**

https://www.youtube.com/watch?v=unw6hrkhoZs

**-Bahweynta Ciidagale oo ku biirtey xisbiga Wadani.**

https://www.youtube.com/watch?v=CAZGG16hjQY

**-Bahweynta Subeer Awal oo Kulmiye isku shubay:**

https://www.youtube.com/watch?v=Hk6q0l--4ko

**-Beesha Makayl Dheere Samaroon Oo Shaaca Ka Qaaday In ay Tageersan Yihiin Xisbiga Waddani**

https://www.youtube.com/watch?v=wF3CVkDi2Q8

-Sagootiskii Mujaahid Axmed Mire  ee madaarka Heathrow –UK:
https://www.youtube.com/watch?time_continue=208&v=WVKte5CW79A

**-Axmed Mire Oo Ka Tirsanaa SNM Oo Hargaysa Lagusoo Dhoweeyay**
https://www.youtube.com/watch?v=lxWLOQPRLMw

-Shirkii Masalaha:
http://waaheen.com/2016/07/12/shirkii-masalaha-ee-ay-abaabuleen-siyaasiyiin-ruug-cadaaya-oo-dhimbiil-kulul-ku-noqday-siyaasiyiinta-muxaafidka-ah/

**كلمة حق يراد بها باطل-**

Tifatirka:

Mareegta Farssahxan..